

## Cagaarshowga A, macluumaadka dadka bukaan socodka ah

### Waa maxay sababta aan anigu u helay macluumaadkan?

Baaritaannadi waxay muujiyeen inaad qabto cagaarshowga A.

### Waa maxay Cagaarshowga A?

Cagaarshowga A waxaa sababa fayras keena caabuq beerka ku dhaca. Waxaa aad isku arkaysaa calaamado ay ka mid yihiin qandho, lalabo, matag iyo daal. Inta badan, dadka waaweyni waxay sidoo kale maqaarkooda iyo indhaha qaybta cadi noqdaan jaalle/huruud. Carruurta ku jirta da'da dugsiga xannaanada caabuqa way yeelan karaan iyaga oo aan wax dhibaato ah la kulmin, laakiin wali cudurka waa laga qaadi karaa. Infekshanku iskii ayuu u tagaa daawo la'aan. Wakhtiga laga bilaabo marka uu qofku cudurka qaaddo ilaa uu calaamadaha ugu horreeya yeelanayo (xilliga uu qofku xannunka qaaday ilaa uu soo shaacbachaxo) waa 2-6 toddobaad.

Qof kasta oo uu hal mar uu ku dhacay cudurka cagaarshowga A wuxuu leeyahay difaac noloshiisa oo dhan, qof kasta oo si buuxda isaga tallaalay cagaarshowga A wuxuu leeyahay difaac ugu yaraan 30 sano.

Qofka khatarta ugu jira caabuqa wuxuu heli karaa tallaal ama unugyada difaaca jirka (immunoglobulin) taas oo uu qofku ka heli karo ka hortag xaddidan haddii uu qaato laba toddobaad gudahooda laga bilaabo wakhtiga caabuqa.

### Sidee loo kala qaadaa cagaarshowga A?

Fayrasku wuxuu ku jiraa saxarada waxana uu inta badan ku faafaa cuntada iyo biyaha wasakhaysan. Infekshanku wuxuu sidoo kale ku faafi karaa qof ilaa qof. Dadka inta badan waxay cudurku ku soo qaadaan waddanka dibadiisa, laakiin Iswiidhan wuu ka dilaacay iyada oo laga qaadayo cuntada iyo dugsiga xannaanada.

### Ilaa intee ayaan anigu cudurka dadka kale qaadsiin karaa?

Waxaa lagaa qaadi karaa laba toddobaad ka hor inta aanad isku arag calaamadaha cudurka ilaa hal usbuuc ka dib markuu maqaarka jirka iyo indhaha qaybtooda cadi jaalle ku noqdaan. Dadka qaba cagaarshowga A, laakiin aan yeelanin calaamadaha, cudurka sidoo kale waa laga qaadi karaa. Dhakhtarkaaga ayaa xaaladahaas oo kale kuu sheegi doona muddada aad dadka kale qaadsiin karto.

### Maxaan ka fikiraa si aanan dadka kale u qaadsiin?

Cagaarshowga A waa cudur guud oo khatar ah sida uu qabo sharciga xakameynta caabuqyadu. Sidaa darteed waa inaad raacdaa xeerarka qaarkood ee dhakhtarkaagu ku siinayo, waxa loogu yeero xeerarka anshaxa. Qof ka mas'uul ah carruur, isaga ayuu qofkaasi xil ka saaran yahay inay carruurtu raacaan xeerarka anshaxa.

#### Xeerarka anshaxa (förhållningsregler):

- Waa in aanad ka shaqayn cunto aan baakad lahayn ama aadan ka shaqayn daryeelka caafimaadka inta lagu jiro muddada aad cudurka gudbin kartid.
- Carruurtu waa in aanay joogin dugsiga xannaanada inta lagu jiro xilliga ilmuu cudurka gudbin karo.

- Waa inaad si fiican u dhaqdaa gacmahaaga markaad musqusha isticmaasho kadib iyo inta aanad wax cunin ka hor.
- Waa inaad isticmaashaa saabuunta dareeraha ah iyo shukumaan adiga kuu gaar ah ama shukumaanada halka mar la isticmaalo.

Haddii aad heshay xeer anshaxa ah oo aad u arakto inuu khaldan yahay, wuxaan la xidhiidhi kartaa dhakhtarka cudurrafaa ee gobolkaaga.

**Si dadka kale looga ilaaliyo caabuqa, waxaa khuseeya waxyabahan soo socda:**

- Waa inaad si taxadder leh u nadiifisaa kursiga musqusha ee lagu fariisto iyo saxanka musqusha ee lagu weji dhaqdo markaad isticmaasho kadib.
- Haddii ilmo xafaayad loo xiro uu cudurka sido, waa inaad si fiican u dhaqdaa gacmahaaga markaad xafaayadda beddesho kadib oo aad si fiican u nadiifiso miiska xafaayada lagu beddelo. Xafaayaddaha la isticmaalay waxaa lagu ridayaan bac waxaana lagu tuurayaa qashinka caadiga ah.
- Waa in aanad u diyaarin ama aanad u maalin unto dadka kale.

Haddii aad ka shaqeyso unto aan baakad lahayn, sida uu qabo sharciga cuntada ee Yurub, waxaa waajib kugu ah inaad u sheegto cidda aad u shaqayso cudurka caabuqa ah ee aad qabto sida ugu dhakhsaha badan.

**Intee in le'eg ayey qofka khuseeyaan xeerarka anshaxu?**

Xeerarka anshaxu waxay khuseeyaan inta cudurka lagaa qaadi karo. Dhakhtarkaaga ayaan kuu sheegi doona muddada aad wax qaadsiin karto.

**Raad raaca caabuqa**

Sida uu dhigayo sharciga ilaalinta caabuqyadu, waa khasab inaad ka qaybqaadato raad raaca caabuqa. Taas macnaheedu waxaa weeye inaad siiso macluumaa shaaqalaha daryeelka caafimaadka si ay u soo baaraan goorta, meesha iyo sida aad u qaaday iyo in laga yaabo inaad dadka kale qaadsiisay.

Waxa aad sheegto waa sir (qarsoodi) dadka aad sheegi doontaana ma ogaan doonaan qofka aad tahay.

**Macluumaa dheeraad ah**

[Hepatitis A | 1177 \(1177.se\)](https://www.slf.se/hepatit-a)



**Warqad ku saabsan ilaalinta cudurrada faafa**

Warqadda ilaalinta cudurrada faafa waxaa soo saaray Ururka caafimaadka ilaalinta cudurrada faafa waxayna khuseeysa heer qaran.